Somalinkielinen kasvatusvihko vanhemmille

# Barbaarinta caruurta iyo waalidnimada

*"Talo adigaa ku nool ee iyadu kuguma noola"*



Väestöliitto

# Barbaarinta caruurta iyo waalidnimada

## TUSMADA BUUGA


HOR U DHAC!

1. CARUURTU WAA QEYB KA MID AH REERKA IYO BULSHADA KUNA BARBAARA
2. SOO GUURITAANKA WAXAA LA XIRIIRA IS BEDELLO BADAN
3. FIKRADO KU SAABSAN BARBAARINTA CARUURTA OO LOOGU TALA GALEY AABAHA IYO HOOYADA
4. LA QABSASHADA WADANKAN
5. SIDEE CARUURTA WAXBARASHADA UGA CAAWIN KARAA
6. GARO DHIBAATOOYINKA – RAADI CAAWINAAD IYO TALO
7. BARBAARINTA CARUURTA WAA SHAQO ADAG – SIDEE AYAAN UGA SOO BIXI KARAA?
8. XAGEE LAGA HELI KARAA CAAWINAAD



ISBN 951-9450-17-3

Väestöliitto 2010
Taitto ja kuvitus: Osmo Penna

# HOR U DHAC!

Dhaqanada iyo bulshada aduunka oo dhan waalidiinta caruurtooda waxay la doonaan mustaqbal wanaagsan. Waxay doonayaan in caruurtooda ay ka dhigaan dad wanaagsan oo xubin ka ah reerkooda, bulshadooda ayna noqdaan kuwo la qadariyo. Waxaa kaloo jirta in bulsha kasta iyo dhaqan kasta sida caruurta loo barbaariyo ay kala duwantahay.

Ajnabi ahaan waxaad kula kulmeysaa bulshadan cusub dhaqan koriskii aad u baratey ma ahee mid ka duwan, dhaqan koriskii aad u baratey waxaa laga yaabaa in ayaga oo dhan aan kuugu suurta gelin bulshadan cusub. Soo guurida waxey bedeshaa wax yaabo badan, waxaana laga yaabaa mid ka mid ah taasi iney tahay barbaarinta caruurta.

Buugan wuxuu ka sheekeynayaa barbaarinta (korinta) caruurta, waxyaabaha la xiriira soo guuritaanka, xaalada reerka iyo doorka uu waalidka ka qaato barbaarinta caruurta. Sidoo kale wuxuu ka hadlayaa buugan qiimaha luqadaada hooyo iyo ku dheganaashaheeda faa`idada ay u leedahay caruurta iyo ka caawinida caruurta dhanka iskuulka.





miraha geedka
waxaa ku dhex jira
wax kasta oo soo
koritaanka geedka uu u
baahanyahay sidii uu u
weynaan lahaa.

## Caruurta waxay u baahanyihiin la dhaqmid joogta ah ( xiriir joogta ah)

Ilmaha yar kagama mid noqonayaan bulshada cuntada iyo cabitaanka la siiyo oo keliya, ee caruurta waxay u baahanyihiin dad ku hareersan, kuwaasoo hogaaminaya ama la talinaya oo ku hagaya bulshada, kuwaas oo ay ka qaadan karaan tusaale. Sidaa daraddeed ayaa adiga, ilmaha hooyadood aabahood ama qofka mas`uulka ka ah ilmaha aad muhim ugu tihiin barbaarka ( koritaanka ) ilmaha.

Ilmuhu markey koriyaan waxay baranayaan waxyaabo cusub mar walba. Waxaa kaloo muhim ah ilmaha in ay isku haleyn karaan dadka waaweyn ( aamini karaan) iyo in ilmaha la daryeelayo.

# 1. CARUURTU WAA QEYB KA MID AH REERKA IYO BULSHADA KUNA BARBAARA

**Caruurtu wey jecelyihiin in ay wax walba ogaadaan waxbarashadana wey xiiseynayaan.**

Caruurta oo dhan ayaa sidaas ah. Laga soo bilaabo yaraanta caruurta indha ayey kala socdaan wax kasta, marka hore waxbey eeg eegaan kadib dhadhanka, ka dib gacmaha ayey wax ku tijaabiyaan wax yaabo badan ayey baranayaan. Soo koritaanka caruurta waxaa muhim ah in aad u ogaalaatid in ay wax bartaan oo ay tijaabiyaan wax yaabo badan oo cusub. Waxay wax ku baranayaa dhegeysiga markaad la hadleysid iyo in ay eegaan waxa dadka kale ay sameynayaan.

Ilmaha markey weynaadaan waxyaabo kale ayey baranayaan. Waxaa kaloo wax ku bari kartaa in aad geyso meelo kala duwan, wax u sheegto iyo in aad wax la ( eegto, la daawato) fiirsatid ama aad wax u akhrisid sida buugaagta. Sidaas ayey ilmaha ku baranayaan waxyaabo faa`ido u ah oo hormarin kara maskaxdooda, dareemayaashooda, xasuustooda, luqadooda wey koreysaa oo ereyaal badan oo cusub ayey baranayaan. Taasina waxay aad ugu wanaagsanaaneysaa markey bilaabaan iskuulaadka.
Ilmaha yar yar waxaa u muhimsan in ay helaan in ay ciyaaraan ayna tijaabiyaan waxa ay yaqaanaan. Ciyaarta ilmaha waxay u hormarisaa siyaabo badan. Ku dadaal sidii ilmaha ay u heli lahaayeen wakhti iyo alaab ay ku ciyaaraan. Mar walbana ma aha in alaabta (lelu) qaaliga ah oo keliya ay u wanaagsan tahay. Alaabta wanaagsan (leluga) waxa weeye kuwa ay caruurtu u isticmaali karaan siyaabo badan ama meelo badan ay ku isticmaali karaan. Alaabta wanaagsan (leluga) waxay caruurta u suurtagelin kartaa ciyaarahan la jilo (la matalo), wayna hormariyaan fekerka ( tusaale ahaan qalimaanta kala duwan, kalarka, kuwa la dhiso oo aya caruurtu is dul dul saaraan).

Baaritaan badan ayaa waxaa lagu ogaadey in ilmaha la ciyaari kara caruurta kale uu noqon karo markuu weynaado qof ku filan nolashiisa. Ilmaha waa la bari karaa in uu ilmaha kale fiiriyo, (ka fekero oo asaga keliya iska fekerin), sharciga ciyaarta uu dhowro, oo caruurta kalena uu la ciyaaro. Sidoo kale reerka ilmaha ugu yar asaga xitaa waxaa wanaagsan in uu barto in uu sugo wakhtigiisa oo asga aan laga hor marin caruurta kale, ma wanaagsana in uu ku soo barbaaro ( Sii asagaa ugu yare ilmaha). Taasi ilmaha ayey dhumineysaa.

## Barbaarintu waa wadajir u joogida oo mar walba ah.

Ilmaha ka hela waalidkiisa wakhti, xanaano, iyo hagid waxay farxad ama faa`ido u tahay waalidkiisa iyo reerkiisa. U dhowaashaha iyo isku xirnaasha waxay isu soo dhoweysaa waalidka iyo caruurta, waxyna xoojisaa is aaminidda. waana qodobka keeni kara dheelitirka iyo barbaaritaanka.
Ilmaha la leh waalidkiisa xiriir wanaagsan xitaa hal waalidba ha ahaatee wey ka muuqneysaa hor u markooda sida waxbarashada iskuulka iyo nolashiisa danbe, ilmaha markaas waxay yeelanayaan mustaqbal wanaagsan.



Wakhti u helida caruurta mar walba ma sahlana ama ma aha mid fudud, laakiin wey kula sameyn karaan waxyaabaha aad sameyneysid oo ay awoodi karaan: tusaale ahaan sida raashiinka loo sameeyo, sida miiska loo diyaariyo, suxuunta, koobabka iyo qalabka kale ee wax lagu cuno. Dukaan ka soo adeegida ayaad u kaxeysankartaa ( u wadan kartaa) isla markaana waad kala sheekeysan kartaa waxyaabihii uu maanta kagala soo kulmey iskuulka ama xanaanada (päiväkotiga). Dheqeyso waxa uu kuu sheegayo ama ay kuu sheegeyso iyo su`aalaha lagu weydiinayo. Tus in aad xiiseyneysid fikradihiisa, nolashiisa iyo waxa uu ku weydiinayo sidaas ayaad ku abuuri kartaa xiriirkiina wanaagsan iyo in uu wax walba kuu sheego iyo is aaminidaba.

Haddii ilmaha aysan laheyn wax uu xiiseeyo oo uu qabto waxay bilaabayaan in ay caajisaan ama caruurta kale ay qash qashaan (dhibaan) ama ay si xun u dhaqmaan. Sidoo kale hadii ilmaha wax badan oo aysan qaban karin laga sugo ilmaha cabsi ayaa geli karta.



**MAXAAN LA SAMEYN KARAA ILMAHA?:**

- buugaagta u akhri la fiirso (la daawo) ka dib kala sheekeyso
- bar sheekooyinka luqadaada hooyo, gabayada, maah maahyada iyo wayaabaha la xiriiri luqadaada hooyo.
- uga sheekee qaraabadaada, wadankaaga iyo waxyaabaha markaas dhacaya
- kala sheekeyso waxyaabaha maalintaas dhacay ama dhacaya kala sheekeyso saaxiibadiisa/saaxiibadeeda
- ilmaha gee oo soo bar meelo kala duwan: magaalada iyo meelaha magaalada ka baxsanba, muusimyada iyo meelaha xaywaanka laga hayo, laybareerlyada iwm.
- shaqada guriga bar: tusaale ahaan raashiinka wada sameeya iyo nadaafada, sida guriga loo nadiifiyo
- bar sida shaqada gacanta laga qabto: sida qalinka loo qabto sida wax loogu qoro iyo sida manqaska wax loogu jaro.


*Xasuusnow mar walba waxaad aragteen iyo waxaad sameyseenba in aad kala sheekeysatid ilmaha. Sidaas ayey ilmaha ku barankaraan waxyaabaha cusub iyo ereyo cusub*

Da`da kale duwan ee ilmaha waxa ay u baahanyihiin waxyaabo kala duwan oo ay sameeyaan. Tan kale ilmaha dabeecadooda ayaa kala duwan, ilma walba ( cunug walba) wax buu ku wanaagsanyahay markaa ma wanaagsana in ilmaha la is bar bar dhigo, ma wanaagsana in la yiraahdo kaas ayaa wanaagsan, kaas  ayaana xun. Ilma walba sida uu yahay ayaa lagu amaanaa  (lagu dhiiri geliyaa).

Ilmaha markey sameeyaan wax wanaagsan waa lagu amaanaa, amaantaa kadib waad ka heleysaa ilmihii in ay sameeyaan mar labaad wax wanaagsan ama ay si wanaagsan u dhaqmaan.

**SIDEE AYAAN ILMAHA UGA CAAWINKARAA SIDII AY CARUURTA KALE ULA DHAQMI LAHAAYEEN?**

- gee ilmaha meelo kala duwan, meel uu caruur kale kula kulmi karo
- ilmaha wakhti sii iyo meel ay ku ciyaaraan
- bar ilmaha sidii uu u sugi lahaa wakhtig-iisa, sidii caruurta kale uu wax ula qeyb-sanlahaa iyo sidii caruurta kale uu ula shaqeyn lahaa (ula ciyaari lahaa)
- dhex gal ama jooji hadii ilmaha uu u dhaqmayo si xun, sida xanaaqa ama uu caruurta kale rabishayo
- bar ilmaha in uu hadal ku muujiyo hadii uu xanaagsan yahay, wax ka xumaana-yo ama uu murugeysanyahay





# 2. SOO GUURITAANKA WAXAA LA XIRIIRA IS BEDELLO BADAN

**( Ku barbaarinta deegaanka cusub)**

Bulshada adiga aad ku soo barbaatey wey ka duwaneyd bulshadan ay ilmahaaga ku barbaarayaan hadda. Wadankaagii hore waxaad la heyd qaraabo, dad ka mid ah reerkaaga, deris, kuwaas oo kaa caawinjirey xanaaneynta iyo barbarinta ilmaha. Ilmaha waxaa suurtagal u aheyd in uu tusaale iyo talaba ay ka helaan dad badan oo waa weyn. Aabaha iyo hooyada waxay tusaalayaashooda ku wareejin jireen jiilka soo koraya, guriga iyo deriska waxay isku fikrad ka ahaayeen xanaaneynta ilmaha.

Ajnabi ahaan xaalada hadda barbaariye hadaad tahay wey ka duwantahay, waayo caawinaada aad heleysid ayaa aad u yar, mas`uuliyadaadana aad ayey u weyntahay, barbaarinta caruurtana ma aha mid sahlan, weliba markaad leedahay caruur badan. Taa weliba waxaa sii dheer sidii wadadii barbaarinta adiga laguu soo barbaariyey, sidii adiga u soo baratey wadada saxa ah waxaa laga yaabaa barbaarinta dhaqanka finishka in aysan isku mid aheyn oo ay is diidayaan ama iska hor imaanayaan waxyaabaha qaarkood.

Dhaqan walba wuxuu leeyahay wax wanaagsan iyo wax xun. Ajnabi ahaan waxaad sameysan kartaa ama aad abuuran kartaa xeer ku saabasan barbaarinta ilmaha adoo labada dhaqanba ka qaadanaya waxa wanaagsan, dhaqankaad ka timid iyo kan aad hadda joogtidba.

Sida ugu wanaagsan ee ciyaar kaa horeysey looga qeybgeli karo waa: tusaale ahaan adoo yiraahda ”ma idinla ciyaari karaa?” ama ”ma wada ciyaari karnaa?”





## Soo guuritaanka aad soo guurtey waxay saameysaa reerka oo dhan

Wadan cusub la qabsashadiisa iyo luqadiisaba wey culustahay ( adagtahay) waxayna khibrad adag ku tahay reerka oo dhan. Waxyaabo badan ayaa si deg deg ah isu bedela. La qabsashadaas iyo isbedelkana waxaa laga yaabaa in ay sanado qaadato. Dad badan oo ajnabi ah ayaa dareema in is bedelkaas uu dheliyo (keeno) wax la yiraahdo isterees ( caajis, wel wel, hordo badan, ama hurdo la`aan) iyo wixii la mid ah.
Soo guuritaanka wuxuu bedelaa xitaa reerka, xiriirka ka

- xasuuso ( ka feker) maxay ahaayeen waxyaabihii lagu garanayey wadankaaga hooyada iyo aabaha wanaagsan?.

- maxay yihiin hooyada iyo aabaha wanaagsan waxyaabaha ay ka sugayaan ilmahooda hadda finland?

- wax kala duwan ama isku mid ah ma ka heshey?.

- maxaa kugu cusub ama kugu adag xaga waalid ahaanshaha finland ee aad la kulanto?.



dhexeeya ninka iyo naagta, qof walba howshii ama booskii uu reerka ka hayey ayaa ku dhici karta is bedel, sidoo kale caruurta iyo waalidka dhexdooda.

Caruurtu (ilmaha) markiiba waxay la qabsadaan dhaqankan finishka ayagoo dhaqankaas kula kulmaya meelaha ay tagaan, sida xanaanooyinka, iskuulada. Isbedelkaa kala duwan oo ku saabsan dhaqanka finishka iyo kaaga ayaa laga yaabaa in uu keeno muran ama is faham la`aan reerka dhexdiisa. Waalidka waxaa laga yaabaa in ay dareemaan in caruurtooda (ilmahooda) ay waayayaan ama caruurtooda ay ku sii socdaan dhaqanka finishka. Caruurta wey kaa hor baranayaan luqada finishka ama iswidhishka. Mar marka qaarkood waxaa laga yaabaa in ilmaha ay khasab ku tahay in uu kuu tarjumo oo arin ku saabsan reerka uu kaaga tarjumoo mas`uuliyiinta wadankan. Markaas caruurta ( ilmaha) waxay qaadanayaa booskii waalidnimada. Waalidka markaas waxaa laga yaabaa in uu dareemo in uu luminaya ama uu waayo waalidnimadii oo ilmihii aysan maqal (dhegeysan) oo hadalkiisa iyo wixii uu yiraahdo aan la qiimeyn.

Haddii caruurta ay mas`uul ka noqdaan arimo badan ama ay xalliyaan arimahaas oo khuseeyey ( ku saabsan) dadka waa weyn (waalidiinta), markaas caruurta waxay weynayaan caruurnimadoodii.

Waalidiinta sida ugu wanaagsan oo ay ku badbaadsan karaan waalidnimadooda iyo kontoroolkii ay waalidnimada ku hayeen waxa weeye in ay luqada bartaan ayna isku deyaan in ay waxbartaan ayna la qabsadaan wadanka ay joogaan, fahmaan, markaas ayey caruurtooda ku hogaamin karaan bulshada ay joogaan. Laakiin haddii caruurta ay ogyihiin in aadan banaanka waxba ka ogeyn ayaga ayaa ku hogaaminaya.



Xataa waxaa laga yaabaa in ninka iyo naagta qof walba meesha (booska) uu reerka ka hayey uu is bedelo, soo guuritaanka meeshan loo soo guurey daraadeed. Bulshadan finishaka waxay had iyo jeer ku celceliyaan sinnaanshaha taas oo dhaqan walba si gooni ah loo fahmo iyo in dumarka ay wax barankaraan, in ay shaqeysan karaan in ay heli karaan lacag u gooni ah. Mar marka qaarkood waxaa laga yaabaa in nimanka ay waayeyaan ( lu minayaan) ixtiraamkoodii iyo raganimadoodii iyo booskii ( meeshii) ay reeka ka joogeen iyo heerkii ay bulshada ka joogeen. Weliba haddii uusan wax camal ( shaqo) ah uusan heyn. Waxaa laga yaabaa in nimanka ay waayaan wax faa`ido leh oo ay qabtaan. Soo guuritaanka isbedelka uu keeney daraadii nimanku waxay raadinayaan in ay reerka ka qabsadaan meel ama boos ay reeka oo dhan ugu faa`ideyn karaan. Hooyada meesha ay ka heyso reerka: tusaale sida, heynta guriga, hooyo ahaanshaha, barbaariyaha caruurta. Hooyadu waxay heysaa shaqo adag.

## Aaba booskiisa ( qeybtiisa) oo noqda barbaariye

Hooyada iyo aabahaba waxay caruurtooda ka sugayaan waxyaabo badan. Waalidka wuxuu sugayaa in caruurtiisu ay si wanaagsan u barbaaraan, ay wax bartaan, ay noqdaan dad waaweyn, ay noqdaan dad shaqeysta, caawiya qaraabadooda



Nin soomaali ah oo meel xanaana ah ka shaqeyn jirey wuxuu yiri:

Ka qeyb qaadashada aabayaasha ay ka qeyb qaataan barbaarinta caruurta faa`ido weyn ayey leedahay. Waxaan arkey caruurta aabayaashooda mar mar ka kaxeeya xanaanada wey ka deganyihiin weyna isku filanyihiin, laakiin kuwa aan aabayaashooda la arag ee mas`uuliyada oo dhan hooyada ay saarantahay waxaa laga arkaa caruurta, hooyooyinkaas wey daalanyihiin ma awoodaan mar walba in ay caruurta wax u sheegaan.

iyo waalidiintooda. Caruurtu si ay u gaaraan heerkaas waxay u baahan yihiin aabahooda in uu goob joog ahaado iyo caawinaad in laga helo marka ay caruurtu u baahanyihiin.


Is bedelka ku yimid reerka dhexdiisa aabaha in uu ka helaa reerka shaqadii uu qaban lahaa, taasoo ah in uu noqdo mid qeyb weyn ka qaadanaya barbaarinta caruurta. Ka qeyb qaadashada ninka uu ka qeyb qaadanayo shaqada guriga iyo barbaarinta caruurta waxay u faa`ideyneysaa caruurta iyo reerkoo dhan. Aabayaasha wakhti siiya caruurtooda wey ka jaanis badanyihiin weyna ka mustaqbal badan yihiin weyna ka waxbarasho wanaagsanyihiin weyna ka edeb badanyihiin kuwa kale ee aan aabayaashooda wakhti siinin. Weyna iska celin karaan caruurta waalidkooda caawiya asxaabta xun xun ee dhumineysa caruurtooda.

Ka qeyb qaadashada aabayaasha ay ka qeyb qaadanayaan howsha guriga iyo barbaarinta caruurta waxay mihiim u tahay reekoo dhan wada noolaashadiisa iyo wadajirkiisa. Dumarka waxay mar mar is weydiiyaan: " Horta raga aan guriga lagu arkeynin, caawineynin caruurta ma u baahanahay, hadaan u baahanahayna xageen uga baahanahay?". Aabayaasha maqnaashahooda badan waxay keentaa in dhumiyaan oo aysan helin ixtiraamkii ay guriga ka mudnaayeen.



SIDEE AABAHA UGA QEYBGELI KARAA:

- in uu ilmaha wakhti siiyo oo uu la ciyaaro, in uu wax baro, iyo in uu uga sheekeeyo, taariikhdooda, qisooyinkooda
- layliyada (casharada) uu ka caawiyo, uu la socdo waxbara-shadooda iskuulka
- in uu geeyo uuna ka qeyb galo waxyaahaba ay caruurta xiiseeyaan
- in uu la qabto xaaskiisa shaqada
- in uu xaaskiisa wakhti siiyo oo ay danaheeda ku soo Fushato



# 3. FIKRADO KU SAABSAN BARBAARINTA CARUURTA OO LOOGU TALA GALEY AABAHA IYO HOOYADA

## Dhiiri geli, u sharax, sababtana u sheeg

Caruurta (ilmaha) waa in la arkaa lana amaanaa marka ay wanaag sameeyaan, si wanaagsan ay dadka ula dhaqmaan. Caruurta waa in loo sharxaa sababta aan loo ogoleyn edebta xun, dhaqanka xun. Waa in loo sheegaa waxa wanaagsan iyo waxa xun.

Mar marka qaarkood codsiga wax laga codsanayo ilmaha iyo sharxida wax loo sharxayo wey ka wanaagsantahay amarka la amrayo caruurta ama waxa lagu khasbayo.

> Tusaale ahaan sidan:
>
> *” Waa muhim in aad horey u seexatid habeenkii, sababtoo ah subixii adoo daalan ayaad soo tooseysaa iskuul tegida wey kugu adkaaneysaa haddaadan horey u seexan.”*
>
> Ama
>
> *”Ma daawan kartid (ma fiirsan kartid) filinkan TV, sababtoo ah looguma talagelin Caruurta. Caruurta waxaa laga yaabaa in ay ku riyoodaan oo ay arkaan riyo xun haddii ay fiirsadaan barnaamijkan ama filinkan cabsida leh.”*
>
> Ama
>
> *”Ugu danbeyn guri kaaley (imow) wakhtigaas sababtoo ah caruurta uma wanaagsana (nabadgelyo) uma aha xilligaas banaanka (magaalada) sababtoo ah iskuul ayaad tegeysaa, tan kale waa inaad horey u seexataa.”*

Caruurta (ilmaha) marka loo sharaxo arimaha, markaas ayey si wanaagsan u fahmayaan sharciyada guriga u yaala, si tartiib tartiib ahna wey u fahmayaan waxyaabaha ayaga u wanaagsan. Ilmaha yar yar waa in loogu soo celceliyaa sharciyada (waxa



la ogolyahay iyo waxa aan la ogoleyn), markey weynaadaan ayey si wanaagsan u qaadanayaan amarada la siiyo. Ilmaha si tartiib tartiib ah ayaa loo aaminaa, ( mas`uul loogu wareejin karaa) waxaa la siin karaa in waxyaabo ka mid ah nolashooda ay ayaga ka taxadiraan, markaa kadib xataa guriga meesha ka baxsan (banaanka) waxay u dhaqmayaan sida aad adiga aad rajeyneysey in ay u dhaqmaan..

Caruurta waxay si wanaagsan tusaale uga qaataan dadka waaweyn, waxay fiiriyaan waxa dadka waaweyn ay sameynayaan ka dib ayagana wey sameynayaan waxay ka arkeen dadka waaweyn. Dadka u dhow ilmaha (qaarabada, hooyada iyo aabaha) waa meesha ay ka qaataan tusaalaha.


Markaa waxaa wanaagsan in ilmaha la siiyo tusaale wanaagsan oo adiga aad noqotid qof lagu deydo.

> *” Camalkeyga ha qaadanine cilmigeyga qaado”*
> *” Ha sameynin waxaan sameeyo ee samee waxaan ku dhaho”*

Caruurta markey xanaaqsanyihiin ama ay hadalka maqli waayaan ama aysan rabin in aysan maqlin waxa wanaagsan in aad sugto inta ay ka soo degayaan, (geyso, fadhiisiiso meel uu ku dego) markaas ka dib in aad ka wada hadashaan oo arimihii aad si wada hadal ah ku dhameysaan. Ilmaha waa la ganaaxi karaa, haddii uu si joogta ah u sameynyo khalad ama uu u dhaqmayo, laakiin ilmaha faa`ido uma keeneyso in la dilo ama jirdil lagu sameeyo. Sharciga finishkana waaba ka mamnuuc dilkaas. Ilmaha yar ama kuwa kaleba tusaale ahaan waxaa lagu ganaaxi karaa in aan la siin wax lacag ah, in aan la siin nac nac, in aan la siin waxyaabo wanaagsan oo horey loo siin jirey oo uu u bartey. Ama waxaa la geyn karaa qol uu ku jirayo keligii mar uu soo geleyo barnaamij wanaagsan oo jecelyahay. Waxyaabo xun haduu sameeyana waxaa loo diidi karaa in uu banaanka aado. Hadaadan adiga isticmaalin qacan qaad ilmaha markaas ma baranayaan in muranka lagu xalliyo dagaal, tusaale ahaan haddii iskuulka uu ka dhaco muran ama meel kale.

Khaanadan hoose waxaa ku qoran dadka finishka ah ee khibrada u leh barbaarinta caruurta taladooda. Waxaana ka heli kartaa warbixin dheeraad ah, tusaale ahaan inta saacadood ee hurdada ku filan caruurta si maskaxdooda ay u weynaato iyo caafimaadkoodaba. Telfishanka fiirsashadiisa (daawashadiisa) badan, ciyaarta kombiyuutarka oo badan ilmaha uma wanaagsana, waayo ilmaha wey ku daalayaan waxayna ka qaadayaan wax maqal la`aan (dhega adeg).

” Ratiga danbe ratiga hore socodkiisa ayuu leeyahay”



TALADA DADKA FINISHKA AH EE KHIBRADA
U LEH BARBAARINTA CARUURTA:

SHARCIGA GURIGA:

- **Caruurta guriga in ay yimaadaan maalamaha shaqada:**
  7-10 jir saacada 19:30 ugu danbeyn 8:00
  11-13 jir saacada 20:00 ugu danbeyn 21:00
  14-16 jir saacada 21:00 ugu danbeyn 22:00
- **Caruurta in ay seexdaan:**
  7-10 jir saacada 21.00 ugu danbeyn 22:00
  11-13 jir saacada 21.30 ugu danbeyn 22.30
  14-16 jir saacada 22:00 ugu danbeyb 23:00

- **Tviiga iyo ciyaaraha geemamka ama kunbuyuutarka ugu badnaan maalintii 2 saacadood in ay ku ciyaaraan**

### Imaha (caruurta) waxay is bar bardhigayaan guriga waxa lagaga sugayo iyo bulshada waxa ay ka sugeyso

Ilmaha marka hore reerka ayuu ku dhex koraa ka dib ayuu aadaa xanaano, ka dib iskuul. Ilmaha inta ay joogaan xanaanada iyo iskuulkaba waxay ku dhex jiraan dhaqan finish, waxay baranayaan tusaale cusub iyo sharciyo cusub, waxay baranayaan luqada finishka, iswidhishka iyo waxyaabo badan oo cusub.

Qof kasta oo waalid ah ama barbaariye ah wadan kasta ha joogee caruurtiisa wuxuu ku dhiiri geliyaa waxyaabaha uu ku wanaagsan yahay oo waalidku uu rumeysanyahay in ilmihiisu uu faa`ido ku keeni karo oo mustaqbal u leh ilmaha iyo bulshadaba. Tusaale ahaan bulshadan finishka waxay qiimeeyaan qofka in uu asaga wax walba uu bilaabo, feker madaxbanaani ah, sidaa daraadeed ilamaha oo yar yar ayey waxay siiyaan in ay go`aano gaaraan oo ku saabsan noloshooda ama in ay ku dhiiri geliyaan ilmaha oo yar yar in ay soo bandhigaan fikradahooda. Dhaqanada qaarkoodna waxay aad iyo aad u qiimeeyaan in ilmaha uu waalidkiisa ku xirnaado oo uu waalidkiisana ka danbeeyo oo uu waalidkiisana ka amar qaato.

**Ka feker bal:**

- Maxaa ilmaha uga i maan kara oo wanaagsan haddii ilmaha la siiyo madaxbaani ayagoo yar yar, maxaase dhib uga i maan kara?

- Ma waxaad ku dadaaleysaa barbaarinta caruurta in ilmaha madaxbanaanidooda ay ku xirnaato dadka kale waxa ay rajeynayaan?.

- Suurtagal ma tahay in aad ku barbaarisid ilmaha madaxbanaani arimaha qaarkood iyo in uu fiiriya dadka kale waxay ka rajeynayaan iyo waxa ay ka sugayaan in uu eego inta aysan go`aanka gaarin?.

Caruurta (ilmaha) wey qaadanayaa waxyaabaha ay dibada ku saa arkaan (dhaqanka) banaanka, kuwaas oo laga yaabo in uu muran ka dhexdheliyo waalidka iyo ilmaha, waxaa laga yaabaa in caruurta iyo waalidka aan arimaas isku si u arag, taas oo keeni karta muran dhex mara waalidka iyo ilmaha. Ilmaha bulshada oo dhan lagama xiri karo laakiin waxa wanaagsan in la ogaado ilmaha asxaabtiisa ( saxiibadiisa) iyo meesha uu ku qaadanayo wakhtigiisa uu guriga ka maqanyahay.
Waxyaabaha wanaagsan ee ilmaha xiiseeyaan sida isboortiga. Wakhtiga fiican ee imaanshaha guriga iyo kontoroolka waalidka ilmaha waxay ka ilaaliyaan waxyaabaha xun xun iyo asxaabta (saaxiibada) xun.

Marka ilmaha iyo waalidka aysan isku fikrad ka aheyn arin, waxa wanaagsan in si wada jir ah looga wada hadlo fikradahaas iyo waxa ay rajeynayaan. Waxaana wanaagsan in la isku af garto arimihii la isku heystey oo midba midka kale uu ku soo dhowaado. Marka ilmaha iyo waalidka uu ka dhexeeyo xiriir wanaagsan iyo is aaminid aad ayey u caawineysaa in wixii dhibaato ah xal loo helo.

Mar marka qaarkood waalidiinta, shaqaalaha xanaanooyinka iyo macallimiinta iskuulada ayaa laga yaabaa in uu khilaaf ka dhexdhaco ayadoo la isku heysto maxaa saxsan maxaase khalad ah, oo qof walba uu si u arko, markaas caruurtii waxaa laga yaabaa in ay ayaga is weydiiyaan ( horta yaa saxsan waalidkeena iyo kuwan) markaa ilmihii tusaale qaadashadii ayuu ka fekereyaa, markaa waxaa wanaagsan in dadka waa weyn ay ka wada hadlaan oo ay isku fikrad u ahaadaan si ilmaha aysan u lumin. Ilmaha waxaa u wanaagsan dadka waaweyn in ay is fahmaan.

Mar marka qaarkood waalidiinta ajnabiga ah wax yar ayey ka og yihiin guriga banaankiisa oo ah meesha ay ilmaha wakhtigooda ku qaataan, markaas wey adagtahay waalidka in uu ku hogaamiyo caruurtiisa wadada wanaagsan tusaale ahaan waxbarashada ama meesha ugu wanaagsan ee ilmaha ay ku qaadan karaan wakhtiyadooda banaan ( ka baxsan xilliga guriga iyo iskuulka). Sidaa daraadeed ayaa waxaa muhim ah in waalidiinta ay ka qeyb galaan ayna fahmaan nolasha ka baxsan guriga iyo waxa banaanka ka dhacaya. Tusaale ahaan waxaa wanaagsan in waalidiinta ay ka geybgalaan shaqada ururada kala duwan ay qabtaan ayna wadashaqeyn la sameeyaan xanaanooyinka iyo iskuulada si ay caruurtooda iyo waxyaabaha dhacaya ay ula socdaan ayna u fahmaan. Barashada finishka, iswidhishka iyo ka qeybgelida waalidka uu ka qeybgeleyo howlahaas waxay xoojineysaa waalidka aad tahay iyo barbaariyaha aad tahay.

KA TAXADIR MURANKA- U SHEEG OO KALA XAAJOW:

- u sheeg xanaanada iyo iskuulka dhaqankaada iyo diintaada, tusaale ahaan raashiinka iyo qaawanaanta
- kala xaajow oo kula heshii xanaanada iyo iskuulka in ay is waafaqaan sharciyada guriga iyo kuwooda
- u sheeg goormaad rabtaa in ay kula soo xiriiraan iyo arimo noocee ah ayaa laguula soo xiriiri karaa

# 4. LA QABSASHADA WADANKAN

## Qiimaha luqadaada hooyo

Luqadaada waxay saldhig u tahay dhaqankaada iyo in aad garatid waxa adiga aad tahay, waxay kaloo isku soo dhoweysaa waalidka iyo caruurtiisa iyo qaraabadiisa. Waalidku wuu ka caawin karaa caruurtiisa sidii ay u baran lahaayeen luqadooda  hooyo. Caruurta waxay luqada ku bartaan oo keliya marka lagula hadlo luqadooda, waxaana aad muhim u ah in la dhegeysto oo la xiiseeyo caruurta marka ay wax kuu sheegayaan ama ay kula hadlayaan.

Waxaa kaloo aad muhim u ah in waalidka ay ku hadlaan oo keliya luqadooda hooyo oo caruurta aadan kula hadalin luqad kale iyo in aad u akhrisid buugaag luqaada ah, haddi aadan wax akhrin karin waxaa wanaagsan in aad la fiir fiirisid xataa buugaagta sawirada leh ka dibna aad uga sheekeysatid waxyaabahaas iyo in aad bartid ereyo cusub oo luqadaada ah. Waxaad kaloo sameyn kartaan in aad la daawatid Tviiga ka dibna aad kala sheekeysatid waxa aad aragteen luqadiinana aad ku sheekeysataan, wixii uu luqadaada ay ku garan waayana aad u sheegtid sidaas ayey ku baranayaa ereyo cusub.
Waxaa kaloo mar mar geysaa meelo cusub, sida maqaalada, leybareeriga, meelaha banaanka ah iyo duurkaba taasoo siyaadineysa aragtidooda iyo fahmidooda. Wada hadalka iyo la sheekeysiga ayey caruurtu ku kororsan karaan luqadooda iyo ereyada ay yaqaanaanba.
Baaritaankii ugu danbeeyey ee lagu sameeyey luqadaha waxay sheegeen in ilmaha luqadooda hooyo si wanaagsan u yaqaana in ay si fudud u baran karaan luqadaha kalena. Caruurta korarsashada luqadooda hooyo iyo kororsashada ereyada luqadooda waxay aad uga caawisaa sidii ay u baran lahaayeen luqada finishka ama iswidhishka iyo sidii ay iskuulka ugu hormari lahaayeen.

## La qabsahada waalidka wadankan

Dad badan oo ajnebi ah ayaa ku riyoonaya in ay ku noqdaan wadamadii ay ka yimaadeen. Xiisahaas ay u xiiseen wadankooda, bulshadii ay yaqaaneen iyo qaraabadooda in ay u dhowaadaan waa mid aad iyo aad u badan. Adkaanshaha wadanka ay joogaan ayaa  kordhin karta  xiisahaas ay u xiisayaan wadankooda  in ay ku noqdaan.

Laakiinse waxaa laga yaabaa riyada noqoshadaasi in ay ka soo wareegato sanado oo welina aan la noqon, isla mar ahaantaana sanadahaasi socda caruurtii waxay noqonayaa kuwo sii koraya oo barbaaraya, sanadahaasi socda maadaama ay caruurtu korayaan waa u mihim, caruurtu wey u baahan yihiin waalidkooda, wey u baahanyihiin waalid caawiya oo wax u sheega oo la taliya, wey u baahanyihiin waalid wax kala yaqaana  bulshada caruurtu ay ku noolyihiin. Sidaa daraadeed waalidka waxaa wanaagsan in uu la qabsado wadankan si uu caruurtiisa uu u caawiyo. Waayo caruurta hadda ay kuu baahanyihiin, hadda oo ay koreyaan ( barbaarayaan) ayey kuu baahanyihiin. Caruurta meeshan ayey ku barbaarayaan hadda, hadda ayeyna kuu baahanyihiin.

Caruurta iyo waalidkaba waa in ay fahmaan wadankan wax barashadu in ay muhim tahay. Caruurta markey helaan caawinaad laga caawinayo iskuulada iyo koritaankoodaba waxay noqonayaan kuwo awood leh oo la qabsada meesha ay  joogaan, kuwo waa weynaada oo mustaqbal leh. Xataa haddii aad wadankiina ku noqotaan ama aad wadamo kale aadaan waxbarashada meel kasta ayey ku anfaceysaa caruurta, la qabsashadoodana wey fududaaneysaa meel kasta oo ay tagaan, la qabsashada reerkoo dhan wuu fududaanayaa.



# 5. SIDEE CARUURTA WAXBARASHADA UGA CAAWIN KARAA

## Waxbarashada maxay muhim u tahay?

Wakhtigan xaadirka ah aduunka oo dhan dadka waxa la weydiiyaa " Maxaa taqaanaa, maxaad soo baratey?". Wakhtigii hore shaqooyin badan ayaa lagu baran jirey in aad fiirsatid ama aad ka qeyb gasho sida loo sameeyo ka dibna aad barato oo sidaas aad shaqo ku hesho, xataa finland sidaa ayey ahaan jirtey. Laakiin wakhtigan xaadirka sida keliya ee shaqada lagu helo waxa weeye adoo iskuul ka soo baxay oo leh xirfad.

Waalidiin badan ayaa sidaa fahamsan hadda oo raba in caruurtooda ay iskuul dhigtaan oo iskuuladana ay ku wanaagsanaadaan. Ma aha dhaxal in caruurta ay iskuulada ku noqdaan aktif ( ku wanaagsanaadaan) ee waxaa weeye sida ilmaha ay iskuulka ugu dadaalaan iyo sida loo soo barbaariyo iyo sida ay u jeclaadaan iskuulada. Caruurta yar yar waalidkooda qeyb weyn ayey ka qaadan karaan sida ay ilmahooda ay ugu wanaagsanaan la haayeen iskuulaadka markey waa weynaadaan.

Waalidka waxay caruurtooda bari karaan sidii ay si degan iskuulada ay u joogi lahaayeen, ay u dhegeysan lahaayeen, waa wax waalidka uu bari karo oo caruurta caawini karta waxbarashadooda. Waxaa kaloo waalidka uu bari karaa luqadiisa hooyo iyo in ilmaha uu la dhaqmi karo caruur walba, uuna la joogi karo.

## Xanaanooyinka iyo iskuul isu diyaarinta

Waalidiinta ajnabiga ah iyo mas`uuliyiinta wadankanba waxay inta badan caruurta kula degdegaan sidii ay caruurta ajnabiga luqada finishka ay u baranlahaayeen. Waalidiinta ajnabiga ah waxay caruurta kula degdegaan in ay geeyaan xanaanooyinka ayagoo doonaya in caruurtooda ay si dhakhso ay u bartaan luqada finishka, iswidhishka, laakiin siyaabo ama waxyaabo badan ayey caruurta ka yar sedex sano ay ugu wanaagsantahay in ay joogaan guriga oo guriga lagu xanaaneeyo. Caruurta marka lagu hayo guriga inta ay ka yaryihiin sedex sano waxay si wanaagsan isu baranayaan waalidkiisa, waxay kaloo caruurta baranayaan luqadooda hooyo billowga oo luqadooda hooyo ayaa dhismeysa. Caruurta marka ay niyadooda dhisanto oo ay wax isku haleyn karaan oo luqadooda ay dhisanto, markaas ayey caruurta la joogi karaan oo dad kale oo ay kalsooni heystaan lana qabsan karaan bulsho kale oo ka duwan tey ku dhasheen.

Wey wanaagsantahay in caruurta sanado markey jiraan in ay la qabsadaan guruub weyn ( caruur badan) iyo luqad ka duwan tooda. Xanaayooyinka ma ahee waxaa kaloo jira meelo badan oo ay caruurtu kula kulmi karaan caruuro kale sida: Xanoonooyinka furan ( avoin päiväkoti), meelaha la isgu yimaado (kerho) waxayna caruurta ku baranayaan meelahaas xirfado kala duwan sida: qalinka wax loogu qoro, loo sawiro, manqaska sida loo isticmaalo, sida loo fadhiyo, sida caruurta kale loo eego (wakhti loo siiyo) iyo sida alaabta loo qeybiyo iwm.

## Sidee caruurta maalinkasta aan uga caawinkaraa iskuulkooda

Caruurta markey iskuulka bilaabayaan, waalidiinta siyaabo badan ayey u caawin karaan: marka ugu horeysa waxaa muhim ah in wiilasha iyo gabdhahaba loo sheego in wax barashada ay aad muhim ugu tahay mustaqbalkooda. Iyo in waalidiintu si joogta ah u  muujiyaan in ay daneynayaan caruurta waxbarashadooda.

Wada shaqeynta iskuulka iyo guriga waa mid aad muhim u ah. Caruurta markey iskuulka bilaabayaan ama marka macalinka la bedelo oo macalin kale uu yimaado waxaa wanaagsan in aad wakhti ka qabsatid macallinka oo aad kala sheekeysatid caruurtaada. Wada hadalkaas oo la isku weydaarsanayo sida uu ku ahaa  galaasyadii hore, iskuuladii hore, waxyaabaha uu u baahanyahay, waxyaabaha suurtagalka ah ee ku adag. Tusaale hadii ay jiraan waxyaabo ku saabsan reerka oo waxbarashadiisa saameyn karta sida: ( xanuun, welwel, muran) taasina wey wanaagsantahay in aad soo bandhigtid hadii ay jiraan arimahaas, markaas macallinka waxbarashada uu siinayey ilmaha iyo wixii uu ka sugayey ilmaha waxaa laga yaabaa in uu si kale uu u siiyo. La kulanka waalidka uu la kulmayo macallinka



sanadka oo dhan waa muhim, waayo waalidka waxaa u suurta geli karta in uu la socdo waxbarashada ilmihiisa iyo in uu wax ka bedeli karo waxbarashada ilmihiisa.

Waalidka wuxuu xaq u leeyahay in uu ogaado arimaha ku saabsan caruurtiisa lana xiriira waxbarashada. Waxay kaloo waalidiintu wax ka bedeli karaan go`aanada ku saabsan caruurtooda.

Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin turjubaan in loo keeno marka ay wada hadal la leeyihiin macallimiinta, in si fiican la isu fahmo oo hadalada la xaqiijo labada dhinacba waa muhim. Waalidku wuu ka codsan karaa macallinka in uu turjubaan u dalbo. Turjubaanada, macallimiinta iyo mas`uuliyiinta kaleba ma faafin karaan arimaha la xiriira reerka ( taas waa ka mamnuuc sharciga finland).

SIDEE AYAAN CARUURTA UGA CAAWIN KARAA WAXBARASHADA

- u diyaari caruurta meel degan iyo miis oo ay casharada ku sameeyaan

- weydii maalin kasta waxa ay iskuulka ku soo barteen, iyo wax ka dhacay iskuulka, iyo xilliga bareega (birifta)

- fiiri (eeg) casharadii loo soo direy in ay sameeyeen, weydii in ay kuu sheegeen waxa ay soo barteen

- hadaadan casharada loo soo direy aadan ka caawin karin, la tasho waalidiinta kale ee caruurta leh qofkii kaa caawin laheyd, ama meelaha caruurta casharada lagaga caawiyo u raadi, ama u raadi qof bulshadaada ah oo caruurta caawiya

- si joogta ah ula xiriir macallinka ugana qeyb gal shirarka waalidiinta ee iskuulka lagu qabanayo

**Caruurtu (ilmaha) waxay xaq u leeyihiin in iskuulka loogu dhigu diintooda, haddii ugu yaraan sedex (3) ardey oo isku diin ah la helo. Waalidiintu waa in ay ogaadaan in loo baahaanyahay in ay sameeyaan codsi qoraal ah oo ku saabsan in caruurtooda loo dhigo diintooda. Magaalooyin badan ayaa xitaa caruurta ajnabiga ah loogu dhigaa luqadooda hooyo iskuulaadka, markaa waalidiintu waxaa wanaagsan in ay weydiiyaan iskuulaadka in ay suurtagal tahay in caruurtooda loo dhigo ( la baro) luqadooda hooyo. Luqadaada hooyo ayaa suurtagal ah in lagu abuuro xiriirka u dhexeeya waalidka iyo ilmihiisa, qaraabadaada, wadankaaga iyo dhaqankaaga. Garashada luqadaada hooyo xitaa waxay kaa caawineysaa barashada luqadaha cusub.**

**Haddii caruurta waxbarashada ay ku adagtahay iskuulka ayaa suurtagal ah in uu diyaariyo waxbarasho dheeraad ah oo ilmaha lagu caawinayo.**

## Goormaa galaaska khaaska ah caruurta ay u baahanyihiin?

*Hadii ilmaha ay si joogta ah ay iskuulka ugu baahanyihiin caawinaad dheeraad ah, waalidiinta iskuulka wey ka codsan karaan in ilmahooda la siiyo waxbarasho khaas ah. Xitaa mar mar waxaa laga yaabaa in waalidiinta qaarkooda loo soo jeediyo fikrad ama lagula taliyo in ilmaha uu u baahanyahay waxbarasho khaas ah (dheeraad ah), tusaale ahaan xanaanooyinka ama isu diyaarinta iskuulka (sanadka ugu danbeeya xanaanada) ayaa waxaa laga yaabaa in la arko in ilmaha uu u baahanyahay caawinaad dheeraad (gooni) ah. Ilmaha waxaa laga yaabaa in ay waxbarashada ku adagtahay, adeeg la xiriiri dareenka nolasha ama da`diisa iyo maskaxdiisa aan isku mid aheyn kuwaas oo u keeni kara adeyg waxbarashadiisa oo markaa uu u baahanyahay caawinaad dheeraad ah. Mar walbana sida arimahaas sida dhakhsaha loo arko ayaa waxbarashadiisa loogu diyaarin karaa sidii loo caawini lahaa ama loogu sameyn karaa arimo hormariya waxbarashiisa, weyna ka suurtagal badantahay sidii uu wax u baranlahaa iyo sidii uu u dhaafi lahaa marxaladaas adag.*

*Waxbarashada khaaska ah waxaa lagu qaadan karaa galaaska caadiga ah dhexdiisa ama galaas khaas ah ama iskuul khaas ah. Galaasyada khaaska ah ardada wey ka yaryihiin ardey ahaan galaasyada kale. Diyaarintaas waxbarashada khaaska ahna rajadeeda waxay tahay sidii ilmahaas loogu heli helaa waxbarashada ugu wanaagsan, booska uga wanaagsan iyo caawinaada ugu wanaagsan ee uu wax uga baranlahaa. Waxbarahsadaas khaaska ah micnaheeda waxa weeye in ilmahaas ay helaan caawinaad badan oo ku saabsan waxbarashadaas. Galaasyadaas waxbarashada khaaska ah lagu bixiyo caruurta tiradoodu wey yartahay markaa ilmaha waxaa u suurtagal ah in uu macallinka ka helo aragti dheeraad ah. Galaasyadaas khaaska ah oo dhan ardey walba waxaa loo sameynayaa waxbasho asaga u gooni ah oo la xiriirta waxbarashada guud iyo sida ugu wanaagsan ee uu wax u baranlahaa. Inta badan ardada u baahan waxbarashadaas khaaska ah waxay dhiganayaan galaasyadaas caadiga ah, laakiin waxaa loo diyaarinayaa caawinaadyo kala duwan oo la xiriirta sidi ay wax u baranlahaayeen. Go`aankaas ah waxbarashada khaaska ah ama galaaska khaaska ah waa la joojin karaa haddii ilmaha aysan dib dambe ugu baahnaan doonin.*

*Iskuul walba wuxuu leeyahay gudi waxbarasho, gudigaas oo isku taxluujinaya (isku deyaya) sidii ay u hormarinlahaayeen wanaaga iyo waxbarashada ardadaas iskuulka dhigata. Koulukuraattoriga (waa qofka iskuulka u qaabilsan xallinta dhibaatooyinka) qofka iskuulka u qaabilsan cilmi nafsiga , maamulaha, qaabilsanaha caafimaadka xaga iskuulka iyo macallimiinta waxay ka wada hadlayaan sidii ilmaha u baahan waxbarashadaas (galaaska) khaaska ah loogu diyaarin lahaa. Waalidiin waa suurtagal in ay ka geybgalaan shirkaas ama wadahadalkaas, kaas oo looga hadlayo ilmahooda. Waxay soo jeedinkaraan fikradooda oo la xiriira ilmahooda waxayna ka geybgeli karaan go`aamadaas laga gaarayo ilmahooda.*

*Wada shaqeyntaas gudiga ayaa lagu sameynayaa jadwalkaas ama qorshahaas iyo hirgelinta caawinadahaas. Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin oo ay saameyn ku sameyn karaan xalka ku saabsan iskuulka oo laga gaarayo ilmahooda. Waalidiinta waxaa wanaagsan in ay tagaan oo ay*
*soo arkaan, soo bartaan iskuulada ama galaasyada lagula talinayo in ay ilmahooda dhigtaan iyo waxbarashada loo diyaariyey ilmahooda iyo qorshaha la diyaariyey (jadwalka) loo diyaariyey caruurtooda.*

*Iskuulo badan ayaa waxaa ka shaqeeya dad asalkooda uu yahay ajnabi oo khibrad barbaarin ah leh oo la shaqeeya iskuulka iyo waalidiinta oo ay waalidiintu la xiriiri karaan.*

# 6. GARO DHIBAATOOYINKA – RAADI CAAWINAAD IYO TALO

## Caruurta waxay isku deyeyaan in ay iskuulka si fudud isku dhaafiyaan ama ay goo gooyaan (ka maqnaadaan)

Caruurta xitaa soo guuritaanku (ajnebinimada) wuxuu ku yahay khibrad adag ama culus. Marmarka qaarkood iskuul aadidu ma aha mid fudud, waxaa laga ayaabaa in loo rabsho ama la arbusho luqada oo aysan garaneynin ama midabkooda dartii. Waalidiinta waxaa wanaagsan in ay ogaadaan in aan la ogoleyn arimahaas noocaas ah , laakiin haddii iskuulaatka ay ka dhacaan arimaha noocaas ah waalidiintu waxay xaq u leeyihiin in ay macallimiinta, maamulayaasha ay ka codsadaan in arimahaas falka xun ay dhex galaan, waxaa kaloo loo dacwoon karaa wasaarada waxbarashada.



Maadooyinka iskuulaatka waxaa laga yaabaa billowga in ay adagyihiin, haddii caruurta ay ku adagtahay fahmida waxa la dhigayo (la sharxayo) wey ay ku adagtahay in ay fadhiyaan galaaska. Markaas oo kale caruurta ma fadhin karaan hadeysan la socon waxa laga hadlayo oo waxay bilaabayaan qash qashaad iyo in ay goo gooyaan galaaska oo aysan ka qeyb qaadaan maadooyinkaas, markaas oo kale waalidiinti wey weydiisan karaan macallimiinta in caruurtooda la siiyo saacado dheeraad ah haddii ay suurtagal tahay ama in adiga aad caawisid caruurtaada ama qof qaraabadaada ah, qof aad isku luqad tihiin oo caruurta ka caawiya casharada loo soo diro.

Si dhibaatooyinka iskuulaatka aysan kugu nogon mid lama filaan ah, waxa wanaagsan in aad caruurtaada kala sheekeysatid mar walba marxaladaha uu marayo. Waxaa kaloo muhim ah in aad si joogta ah ula xiriirtid macallimiinta aadna u jawaabtid macallimiinta haddii ay kula soo xiriiraan.

Waalidiintu wey wici karaan (telefoon) macallimiinta ama wey tegi karaan iskuulada si ay u weydiiyaan in waxa walba ay wanaagsanyihiin. Shirarka waalidiinta, la kulanka macallimiinta waa mid muhim ah.

## Khamriga, daroogada, denbiyada

Caruurta haddii ay bilaabaan, khamriga, daroogada, iyo denbiyada waxyaabo badan ayaa u sabab ah sida: Dagaalda, isbedelada badan, wayaabaha uu banaanka kula kulmo, rajo dhigida. Waxyaabahaas waxaa laga yaabaa in ay u keenaan dhibaatooyinkaas asagoo ka cararayo runta iyo waxa dhabta ah. Caruurta waxaa laga yaabaa in ay dareemaan in dhaqanka uu la yimid ( ay barteen) aan la mid aheyn kuwa reerkiisa, mana gaarayo meel fog, meel uu la qabsanayana ma leh. Wakhtigooda waxay ku dhumiyaan in ay guruub guruun isula socdaan ayagoo ku buuxinaya intaas xiriirkii wanaagsanaa ee ay la lahaayeen bulshada kale, wakhtigooda waxay ku dhumiyaan meel xun.

Weliba caruurta yimid wadankan ayagoo madaxa la soo kacaya ( da yar) waxay culeys weyn ka dareemaan iskuulada iyo koritaanka ay soo koreyaan. Dhibaatooyin badan ayaa isugu urura, ayagoo wakti yar la doonaya in ay luqada bartaan, dugsiga dhexe dhameeyaan iyo maadooyinka oo adag iyo sidii ay ugu gudbi lahaayeen iskuulaadkii kale sida, dugsi sare iyo kuwa xirfadaha isla mar ahaantaana isbelkii ku jirkooda ku dhacayeyna wuu socdaa, kaas oo ah koritaankoodii iyo waxyaabaha waalidkooda uu ka sugayo waxa laga yaabaa in uu khilaaf ka yimaado.

Da`dan oo kale waxa wanaagsan waalidka in uu fahmo oo caruurtii uu caawiyo sidii ay uga gudbi lahaayeen marxaladan adag. Sidoo kale waa in la siiyaa sharciyo cad taasoo caruurta ka ilaalin karta waxyaabaha xun iyo dadka ama guruubyada xun xun oo ay baranayaan. Waa in loo sheegaa xilliga laga doonayayo in ay guriga joogaan, waa in loo sameeyaa caruurta shaqo wanaagsan oo ay xiiseynayaan ( waxay qabtaan, ha ahaatee xittaa isboortiga) waayo caruurta wakhtigooda waxa wanaagsan in ay wax sameeyaan si aysan wakhti ugu helin waxyaabahaas xun xun.

Haddii ay waxyaabahaas la soo gudboonaadaan caruurtaada sida denbiyada (tuugnimada) khamriga iyo daroogada ma wanaagsana

in waalidka uu isaga is canaanto ama uu dareemo ceeb ee waxaa wanaagsan in uu soo bandhigo oo uu dadka kala sheekeysto oo uu raadiyo caawinaad iyo in uu raadiyo sidii caruurtiisa iyo asaga ay u dhaafi lahaayeen marxaladaas adag.

## Dagaalada (dilka) reerka dhexdiisa

Reer kasta mar mar khilaaf wuu ku yimaadaa. Laakiin khilaafkaas laguma xallin karo xoog, waxa wanaagsan in la wada hadlo oo labada qof ay arimahooda ku xalliyaan si nabad ah oo labada qofna ay isku soo dhowaadaan si loo helo xal. Isticmaalada xooga (dagaalka) sharciga ma ogola. Mar mar waxaa laga yaabaa in aad xanaaqdo oo ay ku qabato in aad caruurta dharbaaxdo, markaas oo kale waxaa wanaagsan in aad ka tagtid meesha ama qol kale ama banaanka aad aado si aad u soo degto, markaas aad ka soo fekertid si kale oo aad arintii ku xalliso.

Waalidiinta qaarkood waxaa laga yaabaa in ay la yaaban yihiin caruurta lama dilo. Laakiin dilka caruurta wuxuu keenaa dhibaato, sida: in caruurta lagaa qaado. Waalidka marka uu dilayo caruurtiisa xumaan kama aha ee wanaag ayuu la doonayaa caruurtiisa, laakiin dadka khibrada u leh barbaarinta caruurta waxay sheegeen in dilka caruurtu uu u keeneyo dhibaatooyin hor istaaga hor u marka maskaxdooda sidaa daraadeed ayaan loo ogoleyn dilkaas.

Sidoo kale isbedelo fara badan oo ku yimaada ninka iyo naagta xiriirkoodii iyo soo guuritaanka ayaa waxaa laga yaabaa in ay keento culeys taasoo ka mid ah in nimanka ay yaraato ama ay waayaan mas`uuliyadii ay ka ahaan jireen reerahooda oo taas ay keento khilaaf keni kara dagaal. Waxa wanaagsan in arimahan lagu xalliyo si nabad ah oo wada hadal lagu dhameeyo iyo in aad raadsataan caawinaad iyo talo.


# 7. BARBAARINTA CARUURTA WAA SHAQO ADAG – SIDEE AYAAN UGA SOO BIXI KARAA?

## Waxyaabo aad si joogta ah (maalin kasta) aad u sameyso wey ku caawineysaa

Waxaan horey uga soo hadalney sida soo guuritaanka loo soo guurey wadankan ay u saameyneyso reerka, isbedelka ugu weyn waa istrreeska (daalka) oo kaa qaadaya awooda (xooga). Fekerka aad ka fekereysid qaraabadaada kuwa kaaga soo harey wadankaaga iyo xiisaha aad u xiistey wadankaaga.

Intaas oo dhan waxay adkeynayaan xaaladaada. Waalidiinta waxaa laga yaabaa in ay dareemaan dad aan awood laheyn iyo kelinimo ayagoon markaa la qeybsan karin barbaarintii caruurta dadkii kale oo ay u barteen.

Waxyaabo aad si joogto ah u sameyso wey ku caawineysaa in aad awood yeelato, sida in reerku ay seexdaan habeen walba saacad go`an, wakhti go`an la cunteeyo, iyo in caruurta ay sameeyaan casharada guriga marka guriga yimaadaan wax yar ka dib. Marka ay reerku u bartaan wakhtiyadaas go`an in ay sameeyaan sidaas, nolasha markaas waad qiyaasi kartaa, murankuna wuu yaraanayaa dadkoo dhana si wanaagsan ayey wax u sameynayaan ( ula qabsanayaan ). Mar hore waxaan ka soo hadalney caruurta inta saacadood ay hurdada u baahanyihiin. Dadka waaweyn hordada ay u baahanyihiin habeenkii waa 8 saacadood. Waxaa kaloo



waalidiinta caawin kara socodka iyo banaanka si ay u soo gaataan hawo cusub. Waalid kastana waxaa wanaagsan wiigii in uu helo saacado yar oo uu ku qaato meel ka baxsan guriga, illeyn maalin kasta guriga lama fadhin karee.

## Marka loo baahdo caawinaad ka baxsan guriga

Mar marka qaarkood waxaa wanaagsan in aad caawinaad iyo talo aad weydiisatid meelaha iyo dadka kale, tusaale ahaan qaarabaada, saaxiibadaada, deriskaaga, ururada ama mas`uuliyiintaba.
Inta badan cawaanid bey keentaa xataa haddii aad la sheekeysatid dadka adiga oo kale ah ama dadka ku jira xaalada aad ku jirtid. Xaafada aad degantahay waxaa laga yabaa in ay leedahay meel xanaano furan ah oo la iska tegi karo, ama meel ay ku kulmaan dadka ( reeraha), meel aad tegi kartid adoo wata caruurtaada ama meel caruurta laguugu heyn karo wax yar, tusaale ahaan inta aad wax sameyneysaan ama uu socdo kulankaas. Sidoo kale ururada ku hadla luqadaada waad ka codsan kartaan in ay waalidiinta ama caruurta ay u qaban qaabiyaan barnaamijyo. Xaaladaha aad u adag waad weydiin kartaa sooshalkaaga in aad ka heshid qof guriga kaa caawiya ama caruurta kaa caawiya oo guriga kuugu yimaada, kuwaas oo kaa caawinkara xanaanada caruurta ama shaqada guriga. Hadii reerku uu leeyahay oo keliya hal waalid aad ayey muhim u tahay in uu caawinaad ka helo dibada.

Mar marka qaarkood welwelka, cabsida iyo waxyaabihii aad soo martey waxay buuxiyaan maskaxdaada, nolasha markaas ahna wey adagtahay in aad u soo jeesatid. Rabida raashiinka ayaa kaa yaraan kara, xanuun, hurdo la`aan iyo riyo ayaa laga yaabaa in aad la kulanto. Haddii dhibaatooyinkan ay wakhti badan socdaan waxaa laga yaabaa in dhibaatooyin u keenaan waxyaabihii aad sameyn jirtey maalin kasta iyo waxyaabihii aad xallin jirtey. Markaas waxaa wanaagsan in aad la xariirtid xarunta dhakhtarka ama sooshalada ama in aad wacdid telefoonada gargaarka, meelahaas oo aad ka heli kartid caawinaad, talo iyo sidii aad arimahaas uga bixi laheyd. Marmarka qaarkood daawooyinka dhakhtarka uu qoro wey caawisaa si maskaxdaada ay u noqoto mid ku soo jeeda wanaaga, si aysan u noqon maskax khafiifta. Dadkan khibrada u leh caawintaas lacag la`aan ayey kuugu shaqeynayaan, waxaan waajib ku ah in aysan arimaahaaga dad kale u sheegin



## Waxayaabaha bulshada ay kaa sugeyso iyo caawinaada aad hesho

Bulshada finishka waxaa loogu wacaa ama loo yaqaanaa in ay tahay mid isku filan ama tahay mid horey u martey. Micnaheeduna waa in ay dadkeeda oo dhan siiso caafimaad iyo waxbarasho lacag la`aan ah, waxaa kaloo jira tusaale ahaan wax qabasho lacag la`aan ah sida la talinta xaga caruurta talo iyo daawo sida dadka maskaxda laga hayo. Wadamada isku filnaasha gaarey waxay kaloo dadkooda ugu deeqaan lacag caawinaad ah dadka aan suurtagalka u aheyn in ay shaqeeyaan. Wadamo badan ayaa jira oo aan jirin lacagtan la isa siiyo ama caafimaadkan iyo waxbarashadan lacag la`aanta ah oo dadka laga sugayo in ay ayaga isku filnaadaan oo aan dowlada wax siin ama dadka ay ayaga is caawiyaan dhexdooda, sida caawinaada aad ka hesho qaraabadaada.

Marka bulshada finishka ah ay sidan uga qeybgeleyso nolasha reerka ayadoo ugu deeqeysa waxyaabo badan oo lacag la`aan ah, lacag ahaana ku caawineysa, hadana waxay bulshada kaa sugeysaa in aad xilli hore la soo xiriirto haddii adiga ama reerkaaga aad la kulantaan wax dhibaato ah. Caawinaadaas waxaad ka heli kartaa ama aad ka codsan kartaa meelo badan. Haddii adiga oo dhibaato ku heysato aadan wakhti hore doonan gargaar ( caawinaad) waxaa laga yaabaa dhibaatadadaada in ay badato oo ay adkaato xallinteeda, markaa waxaa wanaagsan dhibka inta uu yar yahay in aad raadiso xal aadna la kaashato meesha aad ka heleyso caawinaadaas (gargaarkaas).
Buugan micnihiisu wuxuu ahaa in waalidiinta la siiyo talo iyo fikrad ku saabsan barbaarinta caruurta si waalidiinta iyo caruurtaba ay ugu noolaadaan nolol wanaagsan bulshadan cusub ee ay deganyihiin. Mar marka qaarkood isku deyida wanaagsan ee ay waalidiinta isku deyeyaan si ay caruurta uga ilaaliyaan waxyaahaba xun xun hadana waxaa laga yaabaa in ay ku guul dareystaan. Markaas oo kale in waalidiinta ay shaki geliso caawinaada la weydiisano meel kale in ay faa`ido keeni karto iyo in kale haddii aysan horey u soo baran ama wadankoodu uusan lahaan jirin dad mas`uuliyiin ah oo arimahaas ka caawiya waalidiinta. Waalidiinta qaarkood waxaa laga yaabaa in ay fikrad khalad ah ka qabaan mas`uuliyiintaas wax caawineysa ama ay kala kulmeenba waxyaabo aysan raali ka aheyn. La xiriirka mas`uuliyaantaas wax caawisa ma wanaagsana in loo arko in ay adiga weerar kugu tahay ee waxa wanaagsan in aad u aragtid mid dan kuu ah oo aad ka heleysid caawinaad dadkaas xilliga aad ku jirtid marxallada xun ama adag. Waalidiinta marka ay ayaga diyaar u yihiin ay wada hadal iyo wada shaqeyn iyo furfurnaan la sameynayaan mas`uuliyiintaas, dadkaas mas`uuliyiinta ah ayaga wey u fududaaneysaa wada shqeyntaas ay la sameynayaan waalidiinta, weyna maqlayaan ama wey qiimeynayaan waxa waalidiintu ay rajeynayaan, waalidiintuna waa laga maqlayaa sida ay u doonayaan in loo xalliyo dhibaatadooda. Is xirxirada uu waalidka is xir xiro iyo diidmada waalidku uu diido wada shaqeynta shaqaalahaas mas`uuliyiinta ah, markaas mas`uuliyiintaas waxay siineysaa ama gelineysaa shaki iyo qiyaas waxa aad u sameyneysid sidaas. Haddii laakiin waalidiintu ay dareemaan in si xun loola dhaqmey ama arin xun lagu sameeyey oo ay dadkaas mas`uuliyiintu ku sameeyeen waxa wanaagsan in aad la xiriirtid dadka bulshadaada ah, ururada bulshadaada ah ama mas`uuliyiin kale kuwaas oo garanaya waxa aad adiga xaqa u leedahay iyo waxa kale oo aad la tashatid dadkaas. Wada hadlka daacada ah oo aad ku dhaqaadid waxaad ku heleysaa xalka ugu wanaagsan.

# 8. XAGEE LAGA HELI KARAA CAAWINAAD

Bulshadan finishka ururo iyo hey`ado badan ayaa waxay bixiyaan caawinaad iyo taakuleyn oo ay siinayaan reeraha (qoysaska). Warbixinta iyo helida hey`adahaas ama ururaadaas ayaa adag, siiba haddii aad tahay qof cusub oo ku cusub wadankan, waayo waxaa laga yaabaa in aadan ogeynba meesha laga helo.

Luqado kala duwan oo ku saabsan ururadaas iyo hey`adahaas siiya qoysaska caawinaadka ayaa waxaad ka heleysaa internetka cinwaankan hoos ku qoran.

**www.caisa.hel.fi**

Bogan internetka ayaad waxaad ka heleysaa warbixino badan oo ay ka midyihiin arimaha ku saabsan: guurka, furniinka, dhibaatooyinka qoysaska, iyo barbaarinta dhalinyarada ama caruurta, dhibaatooyinka maskaxda iyo waxyaabo badan oo la qabatimo. Waxaa kaloo ka heli kartaa bogan ururo ama hey`ado ku caawin kara marka aad ku jirtid marxalad adag oo ay nolashaadu u baahantahay caawin. Sidoo kale magaalada aad degantahay ama xaafada aad degantahay xafiisyada shooshalka iyo xafiiska sooshalka qeybta ajnabiga ayaa ayagana ka heli kartaa ama kugu hogaamindoona meesha aad ka heli karto caawinaad.

Warbixin ku saabsan waxbarashada oo loogu tala galey ajnabigana waxaad ka heli kartaa cinwaankan hoose.

**www.selma-net.fi**

Ururka daryeelka iyo badbaadinta caruurta ( Mannerheimin lastensuojeluliitto) waxay soo saareen buug ku qoran af soomaali oo ka hadlaya xanaaneynta caruurta yar yar, waxaadna ka heli kartaan cinwaankan hoose.

**www.mll.fi > julkaisut > verkkojulkaisut**

Warbixin af soomali ah oo ku saabsan Väestöliiton Kotipuu waxa ay qabato iyo caawinaadka ay siiso reeraha ajnabiga ah waxaad ka heli kartaa cinwaankan hoose.

**www.vaestoliitto.fi/monikulttuurinen_tyo/materiaalit/lastenkasvatusvihkoset/**

Väestöliiton Kotipuu waxay caawisaa dadka asalkooda uu ajnabiga yahay, waxayna sameysaa sidii qoysaska ajnabiga ah hor umarkooda looga shaqeyn lahaa. Kotipuu waxay soo soortaa qoraali ku saabsan ajnabiga.

Qoysaska iyo xiriirka ka dhexeeya labada qof iyo barbaarinta caruurta ayey kotipuu hor marisaa, taas oo ay ka dhigeyso mid tusaale u noqon karta hey`adaha kale ama ururada kale oo ajnabiga ku sameynaya sidii ay ula qabsanlahaayeen wadanka iyo sidii ajnabiga loo caawin lahaa si ay noloshooda u wanaagsanaato ( u hormarto). Shaqaalaha Kotipuu waxay tagaan shirar badan iyo kulano badan oo ay ka soo qeybgeleyaan shaqaalaha wada shaqeynta ka dhexeysa ajnabiga ayagoo shaqaalahaas siinayo waxbarasho ku saabsan dhaqanada qoysaska kala duwan iyo arimo la xiriiri sidii ay qoysaskaas ula qabsanlahaayeen wadankan. Waxaa kaloo Kotipuu qabanqaabisaa shirar ay ka qeybgeleyaan waalidiinta ajnabiga ah, shirarkaas oo looga hadlayo ama lagu falanqeynayo dhibaatooyinka waalidiintu soo foodsaari kara iyo sidii loogu heli lahaa xal, marka ay la kulmaan dhibaatooyinkaas oo kale.

Buugan fikradaha ku qoran waxay ka dhasheen wada shaqeyn ay sameeyeen shaqaalaha Kotipuu iyo guruubkan hoos ku qoran kuwaas oo xil weyn iska saarey fikradahan buugan.
Buugan ku saabsan barbaarinta caruurta waxaa lagu soo akhriyey Sentarka Islamka ee Helsinki (Masaajidka Pasila).

Guruubkan ama kooxdan ka qeyb gashey soorida buugan ayagoo dhan ayaa VÄESTÖLIITÖN KOTIPUU AY AAD IYO AAD UGU MAHAD CELINEYSAA.

Kooxda ama dadka ka qeybgaley soo saarida buugan waa kuwan hoos ku qoran:

Abdulkadir Isak, Abdulkadir Mohamed Mao, Deqa Hersi, Hanna Porvari, Mulki Mölsä, Nasro Farah Dable, Said Aden, Saido Mohamed iyo Sugulle Salah.

Qoraalka buugan waxaa qorey Anne Alitolppa-Niitamo iyo Mohamed Moallin oo ka socda Kotipuu. Buugan oo markii hore lagu qorey afka finishka ayaa waxaa lagu tarjumey af soomaali, waxaana af soomali ku tarjumey Mohamed Moallin.

Waan qaadaneynaa wixii talo iyo tusaale ah ee ku saabsan buugan. Waxaad nagala soo xiriiri kartaan cinwaankan e-mailka ah **kotipuu@vaestoliitto.fi**

Qoraalkan ama buugan asagoo ku qoran afka finishka waxaad ka heleysaa bogga internetka ee Kotipuu.
**http://www.vaestoliitto.fi/monikulttuurinen_tyo/materiaalit/lastenkasvatusvihkoset/**

*Tämä julkaisu löytyy sekä somalin- että suomenkielisenä internetistä osoitteesta:*
**http://www.vaestoliitto.fi/monikulttuurinen_tyo/materiaalit/lastenkasvatusvihkoset/**




Tämän julkaisun teksti löytyy suomenkielisenä ja selkosuomeksi muokattuna internetistä osoitteella:

www.vaestoliitto.fi > Monikulttuurisuus > Julkaisut

**Waxaad ka dalban kartaa buugan:**

Monikulttuurinen osaamiskeskus Kotipuu
Väestöliitto
PL 849
00101 Helsinki
puh: (09) 228 05 143
http://www.vaestoliitto.fi

Väestöliitto